# Liiska hubinta ee Wakiilka La oggol yahay

Isticmaal liiskan hubinta si aad iskugu diyaariso xaalada wakiilka la oggol yahay.

Docwoode wuxuu yeelan karaa wakiil la oggol yahay oo matala. Ka hor inta aadan codsan in aad noqoto wakiilka la oggol yahay ee dacwoodaha, fiiri Xaashida Xaqiiqda ee Hay'ada La oggol yahay iyo Xaashida Xaqiiqda ee Wakiilka uu Magacaabay Dacwooduhu si aad wax uga ogaato noocyada wakiilada iyo dokumentiga(yada) aad u baahan tahay.

## Diyaar garow

**Ka hor inta aadan codsan:**

Waxaan aqoonsanahay oo kaliya hal wakiil oo loogu talagalay dacwoode waqti kasta oo go'an.

## Tallaabada 1: Dooro xirmada saxda ah si aad u buuxiso

Haddii aad tahay dacwoode, waxaad magacaabi kartaa qof si uu u noqdo wakiilkaaga adiga oo buuxinaya Foomka Wakiilka uu Magacaabay Dacwooduhu.

Haddii aad rabo in aad matasho dacwoode, iyada oo sababtu tahay iyaga oo aan naftooda u magacaabi karin wakiil, mid ka soo dooro xirmooyinka soo socda:

- Hay'ada La oggol yahay ee loogu talagalay Xirmada Dacwoodaha Aan awooda lahayn
- Hay'ada La oggol yahay ee loogu talagalay Xirmada Dacwoodaha Geeriyooday

Xirmooyinkani waxay ka kooban yihiin foomamka aad u baahnaan doonto si aad u noqoto hay'ad la oggol yahay. Waxay sidoo kale ka kooban yihiin foomam dheeraad ah oo aad u arki karto in ay waxtar leeyihiin. Labada xirmoodba waxaa laga heli karaa website-kayaga.

**Ogow:** Ka gudub tallaabadan haddii aad tahay wakiil la oggol yahay oo lagu magacaabay nidaam sharci. Waa in aad noo soo dirtaa dokumentiga rasmiga ah, maxkamaddu soo saartay oo xaqiijinaya awooddaada sharci. Waxaad sidoo kale u baahnaan doontaa in aad caddeyso aqoonsigaaga. Fiiri macluumaadka hoosta ku qoran sida loo sameeyo tani.

## Tallaabada 2: Isku soo ururi dokumentiyada

Waxaa jira **saddex** nooc oo dokumentiyo ah oo aad u baahan karto in aad la soo dirto foomkaaga la buuxiyay.

1. **Dokumentiyo la aqbali karo oo loogu talagalay xaqiijinta xiriirka qoys** (Wuxuu khuseeyaa hay'adaha la oggol yahay oo kaliya)

   Marka uu dacwoode uusan haysan qof leh awood qareen ama wakiil maxkamaddu magacawday si uu maamulo arrimahooda, Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo wuxuu oggolaanayaa wakiil la oggol yahay. Qofkani wuxuu u shaqeyn karaa dacwoodayaasha aan awooda lahayn ama geeriyooday. Si kastaba ha ahaatee, waa in ay caddeeyaan xiriirka ay la leeyihiin dacwoodaha.

   Si loo xaqiijiyo xiriirka ay la leeyihiin dacwoodaha, **hay'ada la oggol yahay ee loogu talagalay dacwoodaha aan awooda lahayn** waa in ay bixisaa mid ka mid ah kuwa soo socda:

   - Caddeyn La soo xaqiijiyay ee Dad Wada nool 'Domestic Partnership'
   - Shahaadada Dhalashada oo Sharci ah
   - Shahaadada Nikaaxa oo Sharci ah
   - Dokumentiyada kale, oo ay go'aankiisa iska leedahay Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo ee Oregon, oo ay soo saartay koox saddexaad oo madax banaan oo soo caddeysa guurka, dadka wada nool 'domestic partnership', waalidnimada, ama xiriirka kale ee qoyska ee u dhexeeya dacwoodaha iyo qofka codsanaya in uu shaqeeyo wakiil ahaan isaga oo matalaya dacwoodaha.

   Si loo xaqiijiyo xiriirka ay la leeyihiin dacwoodaha, **hay'ada la oggol yahay ee loogu talagalay dacwoode geeriyooday** waa in ay bixisaa mid ka mid ah kuwa soo socda:

   - Shahaadada Dhalashada oo Sharci ah
   - Shahaadada Nikaaxa oo Sharci ah
   - Dokumentiyada kale, oo ay go'aankiisa iska leedahay Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo ee Oregon, oo ay soo saartay koox saddexaad oo madax banaan oo soo caddeysa guurka, waalidnimada, ama xiriirka kale ee qoyska ee u dhexeeya dacwoodaha iyo qofka codsanaya xaalada hay'ada oggol yahay isaga oo matalaya dacwoodaha.
   - Dokumentiga Ammaanada oo caddeynaya in aad tahay qof leh ammaano 'trustee'.

Fadlan Fasaxa Lacagtiisa La bixiyo ka wac 833-854-0166 haddii aadan hubin in dokumentigaagu buuxinayo shuruudahan.

2. **Dokumentiyo la aqbali karo si loo caddeeyo aqoonsiga dacwoodaha iyo qofka codsanaya in uu matalo dacwoodaha**
   (Ma khuseyso wakiilada uu magacaabay dacwooduhu)
   - Haddii aad wakiil u magacaabayso naftaada, uma baahnid in aad mar kale soo dirto dokumentiyadaada xaqiijinta aqoonsiga.
   - Marka aad codsato in aad noqoto hay'ad la oggol yahay, waa in aad bixisaa dokumentiyo si loo xaqiijiyo aqoonsigaaga iyo aqoonsiga dacwoodaha. Waa in aad noo soo dirtaa nuqulada midabka leh ee laba ah dokumentiyada aqoonsiga ee rasmiga ah iyo mid rasmi ah iyo laba ah dokumentiyada labaad oo loogu talagalay adiga iyo dacwoodaha.

**Dokumentiyada rasmiga ah**

- Ruqsadda baabuur wadista (ama oggolaanshaha qofka baranaya baabuur wadista) oo ka socda gobolka ama dhulka Maraykanka (Waanu aqbali doonaa ruqsadda baabuur wadista ee waqtigeedu dhacay 12 bilood ee la soo dhaafay ee wada dhan.)
- Sawir Aqoonsi oo kale oo dowladdu bixisay (Waa in uu noqdaa dokumenti joogto ah oo sawir leh. Aqoonsiga Militariga, dokumentiyada ku meel gaarka ah ama warqada ah lama aqbalayo.)
- Sawir Aqoonsi oo gobolku bixiyay (Waanu aqbali doonaa Aqoonsiga waqtigiisu dhacay 12 bilood ee la soo dhaafay ee wada dhan.)
- Baasaboor Maraykan ah ama Kaarka Baasaboorka Maraykanka
- Kaarka Degenaanshaha Rasmiga ah ee Maraykanka (I-551)
- Kaarka Aqoonsiga Caafimaadka ee Hawlgabka Ciidanka
- Kaararka Safarka oo ay Ku kalsoon tahay DHS (Global Entry, NEXUS, SENTRI)
- Ruqsadda baabuur wadista ee Canada
- Shahaadada Muwaadin noqoshada (Foomka N-550 ama N-570)
- Kaarka Aqoonsiga qaranka (kaliya haddii la degan yahay meel ka baxsan Maraykanka)
- Federaal ahaan la aqoonsan yahay, Sawir Aqoonsi oo Qabiilku bixiyay
- Fiisaha Aan muhaajirka ahayn oo ay bixisay Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Maraykanka (oo aan waqtigiisu dhacsanayn wax ka badan shan sano)
- Fiisaha muhaajirka ee ku meel gaarka ah (I551) oo ay bixisay Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee

- Kaarka Oggolaanshaha Shaqo oo USCIS bixisay (I-766) (Ma aha kaararka Aqoonsiga oo shaqo-bixiyuhu soo saaray)
- Baasaboor qalaad

Maraykanka (oo aan waqtigiisu dhacsanayn wax ka badan shan sano)

**Dokumentiyo labaad** (Iskaanarada midabka buuxa leh iyo PDF-yada ee dokumentiyada soo socda waa kuwo la aqbali karo in ay yihiin dokumentiyo labaad)

- Kaarka Social Security-ga
- Shahaadada Dhalashada Dibadda ee Maraykanka (FS-545)
- Shahaadada Warbixinta Dhalashada ee Maraykanka (DS-1350)
- Warbixinta Qunsulka ee Dhalashada Dibadda ee Maraykanka (FS-240)
- Kaarka caymiska caafimaadka ee Maraykanka
- Shahaadada dhalashada Maraykanka oo astaan rasmi ah leh ‘official seal’
- Foomka W-2
- Foomka 1098
- Kaarka caymiska baabuurka
- Kaar ka soo gudubka xadka
- Kaarka Illaalada Xeebaha ee Maraakiibka Ganacsi ee Maraykanka
- Foomka Kaarka Aqoonsiga Muwaadinka ee Maraykanka (I-197)
- Kaarka Hindida Canada iyo arrimaha Waqooyiga
- Sawirka Aqoonsiga ardaynimo ee kulliyada ama jaamacada
- Qoraalka kulliyadeed ama jaamacadeed
- Shahaadada ka bixida DOD
- Qoraalka caymiska baabuurta ama guriga
- Warqad caddeynaysa degenaanshaha gobolka
- Shahaadada qofka helaya Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah
- Dokumentiga qabiilka Dhaladka Maraykanka
- Foomka 1099 ee Aan ahayn SSA
- Foomka 1099 ee SSA
- Kaarka isku diiwaan delinta cod bixinta ee Maraykanka ama dhulka Maraykanka ama shahaado
- Shahaadada qofka helaya ee Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC) Puerto Rico

**Dokumentiyo labaad** (Waa in ay ka yar yihiin oo jiraan 90 maalmood)

- **Adeega biilka utility-ga** (oo muujinaya lambarka akoonkaada, magacaaga buuxa, iyo cinwaan hadda ah)
- **Biilka caafimaadka** (oo muujinaya lambarka akoonkaada, magacaaga buuxa, iyo cinwaan hadda ah)
- **Qoraalka bangiga, deynta, ama hay'ad maaliyadeed** (oo muujinaya lambarka akoonkaada, magacaaga buuxa, iyo cinwaan hadda ah; oo uu bixiyay bangigu)
- **Nuqulka jeega 'pay stub'** (oo muujinaya magacaaga buuxa, shaqo-bixiyaha ama magaca shirkadda, cinwaan hadda ah; waa in uu noqdaa nuqulka jeega 'pay stub' ma aha jeega mushaharka)

3. **Dokumenti xaqiijinaya xaalada dacwoodaha**

   - Qofka codsanaya in uu noqdo **hay'ad la oggol yahay oo loogu talagalay dacwoodaha aan awooda lahayn** wuxuu u baahan yahay in uu leeyahay daryeel bixiyaha caafimaadka ee dacwoodaha oo caddeeya in dacwooduhu uusan awood lahayn. Daryeel bixiyuhu wuxuu buuxin karaa Section E ee Hay'ada La oggol yahay ee loogu talagalay Dacwoodaha Aan awooda lahayn ama bixin karaa dokumenti kale oo leh macluumaad isku mid ah.

     **Ogow:** Uma baahnid in aad soo dirto dokumentigan haddii aad matasho dacwoodaha adiga oo adeegsanaya awood qareen ama ay maxkamaddi kuu magacawday in aad matasho dacwoodaha.

   - Qofka codsanaya in uu noqdo **hay'ad la oggol yahay oo loogu talagalay dacwoode geeriyooday** wuxuu u baahan yahay in uu diro warqada geerida ama dokumentiyo kale (oo ay ansixisay waaxdu) kuwaasi oo caddeynaya taariikhda geerida**.**

## Tallaabada 3: Dir dokumentiyadaada

Waxaad ugu soo diri kartaa foomkaaga iyo dokumentiyada xaqiijinta:

- Lifaaq ahaan oo ku socda Foomkayaga Nala soo Xiriir
- Dokumentiyadaada boostada ugu dir:

Attn: Paid Leave Oregon
Oregon Employment Department
875 Union St. NE
Salem, OR 97311